

# Macluumaad loogu talagalay kuwa lagu daaweeyay DuoResp Spiromax<sup>®</sup>



**DuoResp<sup>®</sup>**  
**Spiromax<sup>®</sup>**  
budesonid / formoterol



# Maxaa aniga la iigu qoray DuoResp Spiromax®?

DuoResp Spiromax waa daawada loo isticmaalo ee daawaynta xanuunka neefta iyo cudurka waara ee xirmitaanka sambabbada (COPD). Dhakhtarkaagu wuxu kuu qoray DuoResp Spiromax si ay kuu caawiso oo aad u maamuli lahayd xaaladdaada iyo si looga hortago calaamadaha waxyeelayo nolol maalmeedkaaga.

Waxaa muhiim ah in aad raacdo oo ku dhegnaato cabbirka uu dhakhtarkaagu kuu qoray, xataa haddii aad aad fiicanaan dareemeyso. Sidoo kale, xusuusnow in aad raacdo tilmaamaha lagu siiyey si aad u isticmaasho daawada si habboon oo fiican. Haddii aad heysato inheelar, waa in aad sii waddo sidii aad u isticmaali jirtey ee laguugu qoray.

# Maxaa sababa calaamadaha cudurka neefta iyo COPD?

Calaamadaha neefta iyo COPD (*chronic obstructive pulmonary disease* [cudurka waara ee xirmitaanka sambabbada]) waxaa sababa bararka marinka hawada. Hawomareennada yar waxay kala qaadaan hawada ku iyo ka socoto sanbabadaada, iyo marka ay bararaan hawomareenka wuu yaraadaa iyo mararka qaarkood waxaa ka buuxsami karaa xab. Waay adkaaneysaa in si caadi ah aad u neefsato oo waxa laga yaabaa in aad dareento mid ama in ka badan calaamadahan:

- neef yaraansho
- xiiq
- qufac
- adkaanta xabadka.

## **DuoResp Spiromax<sup>®</sup> waxa uu ka kooban yahay laba walxood:**

- Fudesonide waxay yaraynaysaa iyo ka hortagtaa bararka hawomareenka.
- Formoterol waxay caawisaa in la furo hawomareenka, waxay bixisaa labada gargaar deg deg ah iyo mida fog ee calaamadaha.

Hawo bixiye

## Sida loo isticmaalo DuoResp Spiromax®



Qeybta afka

Furka daboolka



Meesha lagu qoro taariikhda marka baakada daboolka laga furo

Tilmaamaha cabbirka daawada

Waxaad ka heli doontaa macluumaad ku saabsan sida loo isticmaalo DuoResp Spiromax dhakhtarkaaga, kalkaalisada caafimaadka, ama farmashiyaha. Weyddii haddii aadan hubin!

## Fur daboolka ilaaliyaha



Ka qabo inheelarka furka ilaaliyaha ah qeybta afka oo hoos u jeedda. Fur qeybta afka adigoo hoos u laabaya daboolka. Wuxuu si buuxda u furmay marka aad maqasho shanqar. Cabbirka qiyaasta aad ku neefsaneysa waxaa si ootomatic ah loo cabbirey marka aad furto daboolka.

### **Neefta bannaanka u soo saar**

Haddeer waxaa u baahan tahay in aad faaruqiso sambabbadaada. Sii daa neeftada ilaa aad ka dareento degnaan caadi ah. Ha ku neefsan inheelarka dhexdiisa!

# Ku neefso cabbirka



Hadda saar qeybta afka inta u dhaxeeyso ilkahaaga iyo ku qabo afkaaga qeybta afka; ha qaniinin qeybta afka hore ee inheelarka. Waliba, ha ku xirin hawa bixiyeha farahaaga. Gudaha u neefso si xoogan iyo si dheer qeybta afka dhexdiisa.

## Celi neeftaada

Ka qaad inheelarka afkaaga iyo isku celi neeftaada 10 ilbiriqsi, ama ilaa inta aad fiicnaan ka dareento.



## Xir

Si tartiib ah u neefso – ha ku neefsan inheelarka dhexdiisa – iyo xir daboolka ilaalinta ee qeybta afka.

## MASKAXDA KU HAY:

- Ha ruxi daawada inheelarka inta aadan isticmaalin ka hore.
- Ku luqluqo biyo ka dib marka aad isticmaasho daawada inheelarka.
- Waxaa laga yaabaa in aad dareento dhadhansiinno marka la isticmaalayo DuoResp Spiromax®. Tani waa arin iska caadi ah waxaa sabab u ah lactose excipient.
- Haddii ay dhacdo in aad furto oo aad xirto furka adigoo aan qaadan cabbirka lagugu talo galay, cabbirka saxda ah weli wuu jiri doona ilaa wakhtiga xiga ee aad isticmaali doonto inheelarka. Si kastaba ha ahaatee, iska ilaali furitaanka iyo xiritaanka furka haddii aadan isticmaaleynin inheelarka maadaama tilmaamaha cabbirka daawada uu hoos u tirin doono tirada cabbirka wakhti kasta oo aad furto iyo aad xirto furka.

# Qorshahaaga daaweynta

Inta laguugu talo galay in aad qaadato ee daawada DuoResp Spiromax® waa:

---

---

---

## Macluumaadka xiriirka:

Dhaqtarka/kalkaalisada:

---

Telefoon lambarka:

---

Saacadaha taleefanka:

---

DuoResp Spiromax® (budesonide/formoterol). Budo gudaha loo neefsado. Daawada la isku qoro. **Isticmaalka:** DuoResp Spiromax waxaa loo isticmaalaa in lagu daweyyo cudurka neefta ama cudurka waara ee xirmitaanka sambabbada (COPD). DuoResp Spiromax waxaa loogu talagalay dadka qaangaarka ah ee 18 sano jirka ah iyo kuwa ka wayn oo keliya. **Digniinaha iyo ka taxaddarrada:** Kala hadal dhakhtarkaaga, farmashiilaha ama kalkaaliyaha caafimaadka kahor inta aadan isticmaalin DuoResp Spiromax haddii aad qabo cudurro kale ama aad qaadato dawooyin kale. Waa isla sidaas haddii aad uur leedahay ama aad naasnuujinayso ama aad qorshaysanayso inaad ilmo dhasho. **Fadlan si taxaddar leh u akhri waraaqdan macluumaadka.** DuoResp Spiromax waxaa laga helaa Teva Sweden AB, Box 1070, SE-251 10 Helsingborg, Sweden. Maarso 2017 SW/RESP/17/0013a